# Gorfeyn Buugga “Baadigoobkii nabadda Geeska” ee uu qoray Danjire Maxamed Cabdi Afey

**Gorfeeyntii Aadan Makiina**
**Feb 2, 2026**

---

***Odhaahda Gorfeeyaha:*** *Buug ahmiyad taariikheed leh, kana warramaya waxyaabihii halakeeyay Afrikada dhammaanteed siiba Geeska Afrika oo uu qoray Danjire Maxamed Cabdi Afey, oo goor dhow la daabacay waana mid xanbaarsan duruufooyiin taarikheed oo kala geddisan. Buuggan oo ku qoran af Soomaali, wuxuu anfacayaa cid kasto oo dooneysa in ay wax ka ogaato ama ka barato taariikhda Geeska Afrika. Qoraaga oo ah dalmareen abaabulan, wuxuu ka sheekeynaya la kulankiisi madax ka kala timid adduunka dacalladiisa, dareenkoodi iyo damacoodi dahsoonaa, feejignaan la’aanti madaxda Soomaaliyeed iyo kala durugsanaantooda dhanka arrimaha bulshada, siyaasadda, iyo dhaqaalaha guud. Wuxuu qeexay qoraaga in uu yahay qofki ugu horreeyay ee Soomaalida Kiiniya ku qora buug afkiisa hooyo–kaas oo ah afka hodanka ah ee Soomaaliga ee soo jireenkaa ahaa. Waa suugaan da’ weyn oo u soo hoyatay Soomaalida Kiiniya, waayo, waxay horseedi doontaa in jiilka da’da yar ee maanta iyo kuwa soo socda ay ku mahadiyaan una kuur galaan muhiimadda afka Soomaaliga uu leeyahay. Buuggan oo lagu tarjumay afka Ingiriiska ayaa la filaya in uu soo baxo bisha Abriil ee sannadkan aan ku jirno.  Haddaba si aad uga dhugato Gorfeynt ah buugga, hoos ka akhri.*


______________

Waxaa ii Sharaf iyo mudnaan ah in aan gorfeeyo buugga “Baadigoobkii Nabadda Geeska Afrika” ee uu qoray Danjire Maxamed Cabdi Afey. Maxamed Cabdi Afey waa qoraa, isla markaana ah Danjire ama dibloomaasi, horeyna u ahaa Mudane Baarlamaan ka soo jeeda degmada Wajeer ee Gobolka Woqooyi Bari ee Kiiniya haddana loo yaqaan “Wajir County” afka qalaad oo la mid ah Gobolka Wajeer. Hordhaca buugga wuxuu faahfaahinayaa duruufihii adkaa ee uu qoraaga la kulmay, waxayna ahayd Qarnigii 20aad oo ahaa xilli Afrikada dhammaanteed ay la tacaaleysay xurriyad u dirir–taas oo ay sabab u ahayd kala qaybinta Afrika oo ay hormuud ka ahaayeen waddamada Yurub qaarkood.

Buugga wuxuu ka koobanyahay 13 cutub ayadoo cutubka ugu danbeeya ay ka muuqdaan sawirro xiiso badan. Sidoo kale, dhexda cutubyada qaarkood waxaa ka dhex muuqdaa sawirro aad ku arki doonto qoraaga oo la kulmaya madax Soomaaliyeed, kuwo Kiinyaan ama Kinyaati ah, iyo qaar kale oo caalamka daafihiisa ka kala imid. Qoraaga waa qof ku talaxtegey derejooyiin isku wada eg marka af Soomaali ahaan loo eego–waana kuwa aynu u naqaano ergey, dibloomaasi, safiir, ambashatoor, xildhibaan ama hoggaamiye.

In qofka yeesho hannaan xigmadeed oo kala duwan ama taqasusyo kala nooc ah waa lama huraan. Inta badan, madaxda Soomaalida waxay isku mushquuliyaan ama isku maaweeliyaan hal nooc oo derejo ah.

Dibloomaasi Maxamed Cabdi Afey waa qof aqoon ballaaran leh ama wax baranaya. Qofka noocaas afka qalaad waxaa loo yaqaan *Polymath*. Sido kale, waa *Philomath* oo la micne ah qof jecel waxbarashada iyo culuunta kala duwan. Sideedaba, cilmigu siyaasadda, cilmi nafsiga, iyo barashada dib-u-heshiisiinta aadanaha waxay horseeddaa u kuur gal wax hor leh.
Qoraaga, maadaama uu ku dhex jiray muddo dheer arrimo la halmaala dad leh jinsiyado iyo afaf kala geddisan, waxaa garashiisa ku soo kordhay aragtiyo u gaar ah oo lama ilaawaan ah.




Buugga “Baadigoobkii nabadda Geeska” Xuquuda Sawirka waxaa iska leh @RAbdiAnalyst

Waa buug qofka akhrista indhihiisa soo jiidanaya maadaama loo daabacay hab casriyeysan isla markaana ka warramaya duruufo kala geddisan. Waxa laga yidhi buugga ayaaba ah mid aan hore loo arag. Tusaalle ahaan, dhowr qof oo madax ka ahaa Soomaaliya ayaa ka bixiyey hadallo dhaxal reeb ah.

Dhanka *Milicsiga Sooyaalka*, Mudane Xamsa Cabdi Barre oo ah Ra'iisul-wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuu yidhi "Danjire Afey, wuxuu muujiyay karti, daacadnimo, hufnaan iyo adkeysi, taaso dhaxalsiisay in uu ku guuleysto waajibaadkii loo igmaday (Afey, 2025, p.12)." Ereyga dhaxalsiin waxaa loo fasiri karaa wax uusan horey u aqoon oo ku soo kordhay garaadkiisa ama garashadiisa.

Sidoo kale, Mudane Sheekh Shariif Sheekh Axmed oo ahaa Madaxweynihii Hore ee Soomaaliya, wuxuu qiray in Danjire Maxamed Cabdi Afey ahaa dibloomaasi muhiim noo ahaa wakhtigii maxkamadaha, iskuna dayey in uu ka midho dhaliyo in Soomaalidu heshiis gaarto. Sheekh Shariif wuxuu hadalkiisa sii raaciyay, "Aniga saamayn gooniya ayaa hawlihiisa igu lahaayeen (Afey, 2025, p.13)." Saameynta gooniga ah ee uu Sheekh Shariif tilmaamay waa hal-ku-dheg ama dareen u gooni ah. Waxaa jiraa cutub ka sheekeynaya gelitaanki Sheekh Shariif xuduudda Dalka Kenya.

Mudane Sacid Cabdullaahi Deeni oo ah Madaweynaha Dowlad Goboleedka Soomaaliyeed ee Puntland wuxuu sidoo kale yidhi "Danjire Maxamed Cabdi Afey wuxuu qayb libaax ka soo qaatay hanaqaadka nabadda iyo dowlad dhiska Soomaaliya waxaa sidoo kale dhigaalka muujinayaa dadaalkii uu galiyey Danjire Muxammad sidii uu ku horumarin lahaa hamigiisa ka qeybgalka siyaasadda Dalka Kenya (Afey, 2025, p.14)." Hamiga uu sheegay Madaxweyne Saciid Cabdullaahi Deeni, waa la jaanqaad u hor lahaa ama ku cusbaa qoraaga, waana tallaabo uu ku guuleystay.

Waxaa kaloo xusid mudan hadal aan ka soo xigtay buugga waana hadalkii Mudane Danjire, Xuseen Cabdi Xalane oo buugga ku xardhan, wuxuuna yidhi, "Diiwaanka uu taariikh nololeedkiisi ku soo miinguuriyay Danjire Maxamed Cabdi Afey, wuxuu xanbaarsan yahay taxanaha dhacdooyiin mug leh oo wax ku soo kordhiyey geeddi-socodka siyaasadeed ee Geeska Afrika siiba Soomaaliya." Danjire Xuseen Xalane wuxuu hadalkiisa sii raaciyay hadal wax-ku-ool ah kaas oo ah "Saameynta Danjire Afey ku lahaa dib-u-yagleelka Dawladda Soomaaliyeed waa mid ajnebi iyo Soomaaliba ka marag kacayaan (Afey, 2025, p.15)." Dib-u-yagleelka ee uu magac dhabay Danjire Xuseen Xalane waa ciyaar labaad ama ciyaar u dhaxaysa laba kooxood ama ciyaartoy loolameysay, taasna waxaa marag u ah in qoraaga ku hawlanaa dib-u-heshisiin labo kooxood oo siyaasad ku loolameysay.

Sidoo kale, Mudane Fahad-Yaasin Xaaji Daahir oo ahaa la taliyihii hore ee Amniga Qaranka ee Madaxweyne Farmaajo wuxuu iftiimiyey hadalkan qiirada badan: "Danjire Afey waa qof naftiisa sameeyey, oo nolosha inta ka hor timid xoog u soo jiiray, ilaa uu yoolkiisa soo taabtay waana sababta uu magaca iyo maamuuska uu hadda huwan yahay ku gaarey." Mudane Fahad Yaasin wuxuu kaloo yiri, "Sida taariikh nololeedkiisa ka muuqata, Safiirka wuxuu wakhtigiisa u huray danaha qawmiyadda Soomaaliyeed, dhiig iyo dhalasho run ah ayuu muujiyay (Afey, 2025, p.16)." Mudane Fahad-Yaasiin Xaaji Daahir wuxuu oodda ka qaaday in qoraaga uu muujiyay oraahdii ahayd "dadaal gaadhi doontide."

Hadallada raggaas Soomaaliya laga yaqaan ay ka soo tebiyeen dadaalka qoraaga, ma aha wax la dhayalsan karo maadaama Maxamed Cabdi Afey uu ahaa mid ka cayaaray door weyn Soomaalinimo iyo Soomaali jaceyl awgeed. Waxay muujineysaa in hadafkiisa ahaa dadkaaga iyo dalkaagaba u muuji wanaag si hagar la'aan ah. Waa dadaal huwan riyaaqid maadaama uu u feejignaa sidii Soomaali ku heli laheyd degganaansho, kala dambeyn, isu tuird, kal gacayl walaaltinimo, isu tanaasulid, wada shaqeyn, iyo dawlad loo dhan yahay oo leh tayo lama ilaawaan ah.

Maadaama ay Reer Guuraa ahaayeen, qoraaga wuxuu dhashay ayadoo geeddi lagu jiro, kadib markay hooyo Muslimo Cabdiraxmaan Cismaan (Allaah ha u naxariistee) ay fooshi qabatay, waxayna ahayd Sannadkii Soomaalida degta NFD ubixisay "Joon ka Carar." Dabcan, Joonki (John) laga cararayey wuxuu ahaa madaxeynihii ugu horreeyay xilka madaxtinimada qabta dalka Kiiniya oo la odhan jiray Jomo Kenyatta. NFD oo ah Northern Frontier District afka qalaad, waxaa loo tarjumi karaa degmooyinka dhaca xuduudaha Woqooyi Kiiniya, waana degmooyinka kala ah Gaarisa, Wajeer, Mandheera, Mooyaale, Marsabit, iyo Siyallow. Afka qalaad waxaa loo qoraa Garissa, Wajir, Mandera, Moyale, Marsabit iyo Isiolo.

Yaraantiisi wuxuu la kulmay dhacdooyiin aad u xanuun badnaa kuwaaso oo ay kamid ahaayeen dhaqamo ay xukuumadihii is daba joogga ahaa ee Kiiniya ufasaxday ciidamadeeda, siiba, in Soomaalida Kiiniya ay ula dhaqmaan sida ay doonaan. Matalan, Xuska Xeerka Magdhawga wuxuu siiyey militeriga xuquuq ay ku dili kareen qof kasta oo Soomaali ahaa, in ay dhici kareen oo ay la wareegi kareen hantidooda, in ay kufsan kareen gabdhaha iyo hooyooyinkood, iyo in ay xidhi kareen qofka Soomaaliga ah oo aan haysan matalaad qareen, iyo falal kale oo watay walbahaar iyo xadgudubyo aan la soo koobi karin.

Qoraa Maxamed Cabdi Affey waa libaax lama taabtaan ah maadaama uu soo bandhigay halkudhegyo aysan innaba ha yaraatee siyaasiyiinta Soomaalida Kiiniya ku dhici karin in ay soo tebiyaan wax u dhigma aan ka ahayn dabeecado ay kamid yihiin kabo-leefnimo, dabanashleynta dhaqamada gurracan, koolkoolin xukumado aan qaddarin iyo ixtiraam bani'aadminimo iyo kala dambeyn iyo weliba daneysi aan kala go' lahayn, sedbuursi, xatooyo xoolo dadweyne iyo damac is-daba-joog ah. In uu soo qabto jagooyiin qarameed iyo kuwo calami ah ayaa u shalay in uu ka dheeraado ama ka fogaado dhaqamada  foosha xun.

Waxbarashadiisa waxaa qayb libaax leh ka qaatay adeerkiis oo la odhan jiray Aadan Affey Xasan (1937-2018) oo ka yaraa aabbihiis Cabdi Affey. Waxaan Allaah uga baryayaa aabbihiis iyo adeerkiisaba in uu qabriga u ballariyo isla markaana geliyo jannada Al-Firdows, Aamiin Yaa Allaah. In kasto horey loo yiri "sed Ilaahey kuu qoray kolla seegi meysid", qoraaga wuxuu garab ka helay adeerkiis kaas oo u tafaxeyday siduu ku heli lahaa waxbarasho lama ilaawaan ah oo aanan innaba is dhimmin illaa maanta. Walow qof kasta uu u baahanyahay garab uu ku tiirsado ama ku taagsado, adeer Aadan Affey waxaa lagu xasuustaa dhaqan wanaagsan, mideynta dadka, iyo firfircoonaan dhammeystiran maadaama uu isku xilsaaray siduu ugu baraarujun lahaa dadka miyiga degganaa xilligaas in caruurtooda ay geeyaan iskoolada si ay uga baxaan waxbarasho la'aan, weyna u suurto gashay ugu dambeyntii.

Hase yeeshee, dad badan oo Soomaali ahaa ayaa aaminsanaa waxbarashada cilmiga calmaaniga ah ee laga dhigi jiray iskoolada uu horsed u ahaa diin ka bax iyo gaalnimo.

In kasto Adeer Aadan ahaa nin yaraantiisi ku wanaagsanaa dhaqidda xoolaha miyiga, ugu dambeyn wuxuu nasiib u yeeshay in uu waxbarto, goor dambena wuxuu karraani ama xoghaye (secretary) ka noqday magaala madaxda Garissa. Hab dhaqankiisi iyo heybadiisi wanaagsanaa, deeqsinimadiisi iyo waxtarkiisi ayaa ah mid illaa imminka lagu sheekeysto. Adeer Aadan Afey wuxuu u tartamay jagada siyaasadeed ee Mudane Baarlamaan (Member of Parliament) xagga Wajeer laakiin kuma uusan guuleysan, hase yeeshee, waxaa dhaxal uyeeshay jagadaas Mudane, qoraa, siyaasi, ergey ama dibloomaasi Maxamed Cabdi Afey.

Dabcan, Qoraaga wuxuu halbeeg ka dhigtay oraahda ah “dadaal gaadhi doontide”, waana midda u sahashay in uu guul ka gaadho marxaladihii kala geddisnaa ee uu soo maray. Haddaba, waxaa mudan in lays xusuusiyo in dadaalka uu ku xidhanyahay sabar ama dulqaad joogta ah iyo iimaan wanaagsan. Si dadka looga dhaadhiciyo wanaaga waxbarashada ay leedahay, wuxuu gumeystihii Ingiriiska dalbaday nin laga keenay magaalada Mombasa oo la odhan jidhay Sheekh Shibli kaas oo lagu yaqaanay ku dhaqanka diinta Islaamka maadaama uu xidhan jiray Qamiis madaxana u duubnaa. Sheekh Shibli wuxuu si fiican ugu hadli jiray afka Ingiriiska, waana midda usahashay la dhaqanka qolooyinki matalayay gumeysigii Ingiriiska. Imaanshihii Sheekh Shibli waxay sahashay in Soomaali badan geeyaan carruurtooda dugsiyadii Ingiriiska udhisay. Sheekh Shibli wuxuu ka tegey taariikh lama ilaawaan ah maadaama uu ku guuleystay hadafkiisi ahaa baahinta culuunta oo u dhaqan galay.

Qoraaga wuxuu dugsiga Hoose iyo Dhexe ku wax bartay magaalada Mandheera oo saddex-geesood xuduud calami leh; waxay jaar la leedahay Soomaaliya ito Itoobiya–waxaana sida badan Soomaalida Kiiniya ka soo ganacsan jireen magaalada Beled Xaawo oo horey loo yaqaanay Buulo Xaawo oo lagu yaqaanay isdhexgalka bulshada Soomaaliyeed iyo ganacsi tabar leh intaba. Sida uu qeexayo Qoraaga, marka la is barbar-dhigo dhanka ganacsiga labada magaalo ee Mandera iyo Beled Xaawo, magaalada Beled Xaawo ayaa reer Mandera u wax iibsi tegi jireen maadaama sicirka wax kala iibsiga jabnaa. Taas waxay muujineysaa in dhaqaalaha Soomaaliya ka wanaagsanaa midka Kiiniya xilligaas. Gobolka Mandheera waxaa dhex maraa Webiga Daawa (Daua River). dhanka Woqooyi ayey Mandheera xigtaa, dhanka Bari waa Soomaaliya, dhanka Konfur/Konfur Galbeedna waa Gobolka Wajeer.

Goortuu bogay Dugsiga Dhexe, wuxuu ku qalin jebiyay natiijo sare, hase yeeshee, waxaa u suurto geli weyday in uu ku biiro Dugsiga Sare ee Wajeer oo loo yaqaanay *Wajir Secondary School* afka qalaad. Kadib, wuxuu sahansaday dugsi kale kaaso noqday Dugsiga Sare ee Saabuunley ama *Sabunley Seconday School* oo ahaa mid aan marnaba u qalmin maadaama ardadi uu la dhigan lahaa ay noqdeen kuwo tayadooda waxbarasho ay aad u liiteen. Wuxuu ahaa iskool silicsanaa oo innaba aan lahayn wax horumar ah dhanka dhismaha. Waxay ardada ku cuni jireen cuntada geedo hoostooda ayadoo ay wehelisay biyo la’aan, cidlo, iyo abaaro is-daba-joog ahaa.

Maxamed Afey waxbarashadiisi kadib, wuu guursaday wuxuuna billaabay ganacsi yar waxaana sii weheliyay hammi siyaasaddeed. Walow ay jiraan ardo badan oo aan u hoggaansaneyn culuunti ay jaammadcadaha ka soo barteen, waxaa innaba ha yaraatee shaki ku jirin in Danjiraha uu si wanaagsan ula jaanqaaday culuunti uu ku bartay jaammacadaha kala ah Kenyatta University iyo Nairobi University. Jaammacadda Kenyatta wuxuu ku soo takhasusay Siyaasadda iyo Cilmi Nafsiga waana waxa afka qalaad loo yaqaan *Politics and Psychology*, halka doorkiisi labaad ee waxbarasho ee mastarka dhanka jaammacadda Nairobi uu ku takhasusay Xalinta Khilaafaadka Caalamiga oo u dhiganta *International Conflict Resoultion* afka qalaad. Ugu dambeyn wuu ku guuleystay in uu noqdo Mudane Baarlamaan laga soo doortay Konfur Wajeer (1997-2002).

Isla xilligaa, wuxuu ahaa Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Kenya (1997-2002). Kadib wuxuu noqday Safiirka Kenya u fadhiya Soomaaliya (2003-2007). Muddo shan sannadood kadib, waxaa u xigay in uu noqdo xildhibaan la magacaabay (Nominated Member of Parliament) waana sannadihii 2008-2013, xisbigiisana wuxuu ahaa ODM-Kenya. Jagooyinka kale ee uu soo qabtay waxaa kamid ahaa Ergeyga gaarka ah ee urur goboleedka loo yaqaan IGAD oo ah afka qalaad Intergovernmental Authority on Development–waana urur ay ku midoobeen dalalka kala ah Soomaaliya, Kiiniya, Itoobiya, Eritereya, Jibuuti, Ugaandha, Konfur Suudaan, iyo Suudaan. Hawlaha loo igmaday IGAD ayaa ah nabadda iyo amniga, is-dhexgalka dhaqaale, sugnaanta cuntada iyo deegaanka, iyo horumarinta bulshada.

Madaxda Afrika iyo caalamka intiisa kale ee uu la kulmay lama soo koobi karo. Isweydiin maleh in qofka la kulma dad ama ummado kala duwan uu ka faa'idayo la kulankooda waana midda ka dhigtay qoraaga waxa loo yaqaan "dhaqamada kala duwan" ama "multiculturalism". Sidoo kale, aqoontiisa afaf kala duwan ayaa u sahashay in uu la macaamilo dad ka soo jeeday jinsiyado kala duwan, waana waxa loo yaqaan "multilingualism" una dhiganta "luuqado badan ku hadlidda". In uu tegey Jeel Ogaadeen waxaa daliil u ah albaabki iyo gudaha xabsiga ayaaba ku xardhan buugga dhammadkiisa. Wey adagtahay in la helo qof Soomaali ah oo ku dhashay Kiiniya oo sidaas dhul baaxad weyn u maray shalay iyo maanta.

In kasto Soomali horey ugu maahmaahday "nimaan dhoofin dhaayo maleh", waxaa hubaal ah in Qarniyadii Dhexe oo loo yaqaano Middle Ages, faylasuufiyiinti Muslimiinta ahaa oo u badnaa Carab, Turki, iyo Farsiyiin lagu yaqaanay safarro dhaadheer ama gaagaaban ayadoo hadafkooda ahaa cilmi raadis, waxaana illaa maanta la bartaa culuuntii ay ka tegeen oo noqday dhaxal gal lama ilaawaan ah. Sidoo kale, waxaa hubaal ah in Qoraa Maxamed Cabdi Afey uu ka faa'iday socdaalladiisi gaagaabnaa ama dhaadheeraa.

Bishii Sebtembar 13keedi, Sannadkii 2013, waa tii qoraaga oo ahaa Mudane ka tirsanaa Barlamaanka Kiiniya loo igmaday in uu ka qeyb galo sidii Kiiniya iyo Soomaaliya ay u noqon lahaayeen labo dal oo leh saaxiibtinimo qoto dheer maadaama ay deris ahaayeen. Wasiirkii Arimaha Debedda ee Kiiniya oo la odhan jiray Sam Ongeri ayaa ka codsaday Mudane Maxamed Cabdi Afey in ay kulmaan, wuuna ka aqbalay.

Goortey kulmeen, wuxuu soo jeediyay in Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo markaas ku guuleystay doorashada Madaxweyninimada in la booqdo loona soo hambalyeeyo, waana laga aqbalay aragtidiisi. Waxay ku soo beegantay xilli aan Madaxweyne Xasan la dhaarin taladana weli uusan qaban. Waxay Madaxweyne Xasan Sheekh ku booqdeen Hudheel Jasiira (Jazira Hotel) oo uu degganaa. Salaan kadib, waxaa billowday khudbadii hambalyada ee uu billaabay in uu akhriyo Wasiirka Arrimaha Debedda  Kiiniya, hase yeeshee, waxaa debedda ka dhacay qarax aad u xoog badnaa. Waxaan ka ahayn Xasan Sheekh oo kurisgiisa aan ka kicin, dadki kale oo dhan xabadka ayey ku jiifsadeen.

Albaabki laga bixi lahaa ee hudheelka, waana marka laga dego jaranjarada e, waxaa yaallay meydki  qofki is-qarxiyay oo ay ku rakibneed miino aan weli qarxin. Wufuudi Kiiniya iyo kuwi Soomaalida waxaa lagu amray in ay ka tallaabsadaan meydka oo aysan taaban, haddii kale se, miinada wey qarxeysaa. Soomaali geesinimo wey u dhalatee, kuwii ajaanibka ahaa waxaa soo dersay kaadi muuqatoo oo ka soo dililiqeysay saraawiishooda iyo dhidid u da’ayey sida tuubo biyo ah oo la furay. Ugu dambeyn, hudheelki waa la faarujiyay oo wufuuddi Kiiniya waxaa lagu qaaday gaadhi ay lahayd  ciidamada AMISOM, kadibna waxaa la geeyay Gegidda Diyaaradaha Muqdisho oo ay ilaalineysay Ciidamada Ugaandha.

Sannadkii 2013 waxaa Kiiniya ka dhacay doorasho guud waxaana Madaxweyne loo doortay Uhuuru Kenyatta, ku-xigeenkiisana wuxuu noqday William Ruto oo hadda ah Madaweynaha Kiiniya. Waa arrin aan horey u  dhicine, waxaa Wasiirka Arrimaha Dibedda loo dhiibay Aamina Maxamed Jibriil. Waxay Aamina noqotay haweeneydi ugu horreysay Soomaalida Kiiniya ee noqota wasiir debadeed. Xil ama jago banaan waxaa buuxin karaa qof khibrad u leh, waana midda sababtay in Wasiir Aamina ay ku bogaadiso dibloomaasi Maxamed  jagadii ergeynimo ee IGAD  oo horraan uu hayey nin la odhan jiray Kipruto Arap Kirwa. Sababta ay ugu hindisootay Wasiirad Aamina in Maxamed Afey la wareego jagadaas ayaa waxay ahayd, khibraddiisii dheereyd ee in muddo ah uu ku dhex jiray dib-u-heshiisiinta Soomaaliya.

La kulankii Madaxweyne Xasan Sheekh muusan hirgelin, waxaana sababay qaraxi lama filaanka ahaa, hase yeeshee, waxaa isla goobti ku soo booqday Madaxeynihii hore oo ahaa Sheekh Shariif Sheekh Axmed oo u tacsiyadeeyay dhammantood. Isla galabti, wefdigi Kiiniya waxay ka soo degeen Gegidda Diyaaradaha ee Neyroobi ayadoon laba wefdi wada hadlin, wada aamusan oo wada argagaxsan. Wasiirki Arrimaha Dibedda Kiiniya wuxuu u tallaabay dhulkii uu ku dhashay oo ahaa Kisii, si loogu soo duceeyo looguna soo akhriyo Kutubka Injiilka–weyna ka geddisneyd waxa Soomaalida u taqaan “Quraan Saar”. “Af daboolan waa dahabe”, waa kii Wasiir Samuel Ongeri afka jabsaday oo ku eedeeyay qaraxa in uu ka danbeeyay Sheekh Shariif.

Hadalki ayaa meel walba ku baahay waxaana xigay sawirro is-daba-joog ahaa oo ku fiday caalamka oo dhan. Sheeko baraleyda Samuel Onegri uu ka fidiyey Sheekh Shariif waxay noqotay wax kama jiraan, maadaama Sheekh Shariif uu soo wacay Maxamed Cabdi Afey una sheegay in hadalka ka soo guuxay wasiirka Kiiniya uu ahaa kutiri kuteen. Kadib, waxaa dhacday in qoraaga uu wacay Wasiir Samuel Onegri si uu uga noqdo eedeynti Sheekh Shariif, wuuna aqbalay oo ka sii daayey warbaahinta.

Bishii koowaad sannadkii 2004, waxaa magaalada madaxda Kiiniya ee Nairobi siiba xaafadda Safari Park ka dhacay shirweyne ay ka soo qaybgaleen madax badan oo ka kala socday Soomaaliya, Jabuuti, Ugaandha, Suudaan, Eritereya iyo madax kale oo safiiro ahaa. Ayadoo la wada fadhiyo isla markaana la sugayo madax kale ayaa qof kamid ahaa wufuuddi oo Soomaaliya ka socday afka dhegta u saaray Madaxweyne Cabdiqaasim oo si lama filana ah isu beddelay, wejigana guduutay. Beenlowgaas magaciisa sheegi maaye, adiga ka bogo buugga. Qoraaga wxuu ka qeybgalay Shirki Carta ee lagu soo xulay dawladdi ku-meel gaarka ahayd ee uu gogol dhigay Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, iyo xulistii madaxdii Baarlamaanka Soomaaliya, iyo soo shaac bixiddii Burcad Badeedki Soomaaliya intaba.

Hadal iyo dhammaantii, shirarki uu qoraaga ka qeyb galay, dooddihii iyo siday u dhaceen, wey badanyihiin mana habboona in la soo wada koobo waayo, buugga wuxuu u baahanyahay in akhristahu gacanta ku dhigo si uu uga bogto waxyaabaha uu xanbaarsanyahay. Wuxuu ubaahanyahay in aad ku darsato maktabadaada si aad mowlacaada ula fariisato har iyo habeen illaa aad ka sal gaadho. “Soomaalaay giddigiin guntadoo ka kaca, gamac nooma ekee.”

Adan Makina
WardheerNews
Email: adan.makina@gmail.com
------------------
*Uruurinta xogaha buugga ku xardhan waxaa hirgeliyay Shirkadda ALEEN AFRIQUE.*
*Wixii faahfaahin ah kala xiriir:*Email ka ah contact@aleenafrique.com.
Telefoon lambar +252613079451